



Doorashada caafimaad ee Östergötland – waxa aad dooranaysaa xarunta xannaanada caafimaadka

Baahiyahaaga ayaa ku hagaya

Doorashada caafimaad ee Östergötland macneheedu waa in haddii aad ka diiwaangashantahay Östergötland aad si xor ah u dooran karto xarunta xannaanada caafimaadka ee kugu haboon. Baahiyahaaga iyo dalabkaaga ayaa ku hagaya. Mar walba waxa aad helaysaa xarunta xannaanada caafimaadka ee aad doorato, haddii aad ku qanci weydana waxa aad ku celin kartaa doorashada.

Waxa xoogga la saarayaa bukaanka

Xarumaha xannaanada caafimaadka waxa ay uga dhigantahay doorashada-caafimaad tartan loo gelayo bukaanka. Markaas waxa muhiim sii noqonaya in daryeelka caafimaadka lagu habboonaysiiyo baahida bukaanka. Tusaale ahaan qaar ka mid ah xarumaha xannaanada caafimaadku waxa ay kordhin doonaan wakhtiga furnaanta oo waxa ay hagaajin doonaan helitaan-ogaanta.

Sidan ayaad u dooranaysaa

Waxa aad mar walba yeelanaysaa xarun xannaano caafimaad oo joogto ah oo aad la xidhiidho marka aad u baahato daryeel caafimaad. Halkaas waxa jooga dhakhtarkaaga iyo kalkaalisada degmada, isla halkaas ayaa sidoo kale laga maamulayaa daryeelka kale ee aad u baahan doontaan adiga iyo qoyskaagu, sida xarunta daryeelka caafimaadka, guri ku daryeelka bukaanka, iyo dhaqancelinta. Haddii aad ku qanacsantahay xarunta xannaanada caafimaadka ee aad hadda ka tirsantahay, waad iska haysan kartaa umana baahnid in aad wax kale samayso. Haddii aad rabto in aad iska bedesho xarunta xannaanada caafimaadka, waxa ugu sahlan in aad ka samaysa bogga internetka ee Landstinget-ka ee ah www.lio.se.

Waxa aad sidoo kale doorashadaada ku samayn kartaa foomka doorashada-caafimaad qoraal ahaan. Waxa aad iska bedeli kartaa xarunta xannaanada caafimaadka marka aad doonto, waxaana xarunta xannaanada caafimaadka ee kale lagugu meelaynayaa laba bilood gudahood. Qofkasta oo bukaan ah waxa ay xarunta xannaanada caafimaadku lacag kaga helaysaa Landstinget-ka. Adigu bukaan ahaan waxa aad ku bixinaysaa khidmad bukaan oo isku mid ah dhammaan xarumaha xannaanada caafimaadka ee ka tirsan doorashada-caafimaad ee gobolka Östergötland. Sharciyada kaadhka qarashaadka badan iyo kaadhka bilaashka ah waxa ay quseeyaan dhammaan xarumaha xannaanada caafimaadka

Warbixin ku saabsan xarumaha xannaanada caafimaadka

Si aad si sahlan ugu dooran karto isuguna barbardhigi karto, laga yaabee in aad rabto in aad wax dheeraad ah ka ogaato xarumaha xannaanada caafimaadka. Bogga internetka ee Landstinget-ka, tusmeeyaha landstinget-ka iyo joornaalka Hälsotecken ee guryaha u soo dhaca, waxa aad ka helaysaa warbixin af Iswiidhish ah oo ku saabsan waktiyada furnaanta, muddada la sugo booqashada, siday u arkaan bukaanu iyo wakhtiga ay qaadanayso in telefoon lagaa qabto.

Xarumo xannaano caafimaad oo la ansixiyey

Dhammaan xarumaha xannaanada caafimaadka ee doorashada-caafimaad ee Östergötland waa qaar laga ansixiyey Landstinget-ka Östergötland. Taas macneheedu waxa weeye in ay ballan qaadeen in ay bixiyaan daryeel caafimaad oo aasaasi ah oo ay ka mid tahay tusaale ahaan talobixin, dhaqancelin, daryeelka caafimaadka carruurta, waxqabadyo ka hortegid ah, guri ku daryeelidda bukaanka iyo daryeelka caafimaad-darrda maskaxda. Intaa wixii dheer waxa ay xarumaha xannaanada caafimaadku, u hore marin karaan hawlohooda si xor ah ayagoo daryeelkooda waafajiyana bukaannada.

Shuruudda tayada

Landstinget-ku waxa ay si joogto ah dabagal ugu samaysaa hawlaha xarumaha xannaanada caafimaadka si ay u hubiso in wax waliba u socdaan sidii loogu talagalay. Haddii xarun xannaano caafimaad ay shuruudihii raaci waydo, waxa ay Landstinget-ku ka qaadi kartaa ruqsaddii. Landstinget-ka ayuu xilka ugu weyni ka saaranyahay in dhammaan dadweynaha degmadu ay helaan xarun xannaano caafimaad.

Ma rabtaa in aad ogaato wax dheeraad ah ama aad hesho foomka doorashada-caafimaad?

Warbixin dheeraad ah kala xidhiidh xarunta xannaanada caafimaadka ama gal bogga internetka ee www.lio.se/vardval. Foomka doorashada-caafimaad waxa laga soo qaadan karaa xarunta xannaanada caafimaadka ama waxa laga dalban karaa magdhowga caafimaadka oo leh telefoonkan: 010-103 02 19, 010-103 02 24. Bogga internetka ee Landstinget-ka waxa aad si toos ah uga soo gudbin kartaa bedelidda xarunta xannaanada caafimaadka.